

# Give Kids a SMILE

## Waalidka ama Masuullada Sharafta Mudan:

Dhakhaatiirta ilkaha ee Minnesota waxay ka welwelsanyihiin tirada kor u kacaysa ee caruurta ay dhaleen danyarta ee aan fursad u haysan inay helaadan daryeelka ilkaha. Sababtaa awgeed khabarada ilkaha ee kumanaano gaaraya ayaa isugu yaamada Jimcaha iyo Sabtiga ugu horreeya ee bisha Febraayo si ay caruurta baahida u qaba u siiyaan daryeelka ilkaha.

Bandhiggaan khaaska ah ee la yiraahdo "Caruurta Ka Dhoollo-caddaysii" (Give Kids a Smile) waxaa soo diyaariyay Ururka Ilkaha ee Minnesota. Daryeelka ilkaha waxaa laga bixin doonaa rugaha caafimaadka ee jaalliyadahu isticmaalaan iyo rugaha gaarka loo leeyahay ee ku fidsan Minnesota oo idil. Halkaan macluumaad dheeraada ayaan ku qoran:

**Bukaannada oo idili waa in ay ballan horay uga qabsadaan iyo ay la la socdaan waalidka ama masuulka sharciga u magacaabay. Wixii ka dambeeya Janaayo 1**, waalidku waxay wici karaan United Way 211 (riix 2-1-1) ama 800-543-7709. Shaqaalaha waxaa laga heli doonaa liiska rugaha ilkaha waxayna dadka u kala diri doonaan meelo xaafadahooda u dhow. Markaa kaddib waalidka waalidka waxa ay wici doonaan rugta ilkaha si ay ballan uga qabsadaan. Waxaa kaloo loo diyaariyay liistada ay ka gali karaan internetka ee laga helo [www.mndental.org](http://www.mndental.org).

**Adeegyada waay kala duwanyihiin** laga bilaabo daryeelka kahortegista, oo ka mid yihiin nadiifinta, alxamidda iyo daawada floorayd, illaa daryeelka kabitaanka, ay ka mid yihiin ilkaha la buxinayo. Macluumaadka ku saabsan adeegyada khaaska ahi ee la bixin doono waxaa lagu sharaxayaa marka ballan la qabsado.

**Caadi ahaan, caruurta ay ruugaha daaweyn doonaan waa ina ahaadaadan kuwo da'aaddoddu ay u dhaxayso 3 illaa 18 sanadood.** Marka la soo wacayo si ballan looga qabsado, waalidku waa in ay weydiiyaan macluumaadka ku saabsan da'da la qaabilayo.



Ka aqoon kororso adiga oo gala [mndental.org](http://mndental.org).

Fadlan koobi ka samayso dukumiintigan lana wadaag qoysas aad isleedahay way ka faa'iidasan doonaan barnaamijka "Caruurta Ka Dhoollo-caddaysii". Dukumiingaan waxaa kaloo lagu helaa luqadaha Hmong, Isbaanishka, Vietnamese, Soomaaliga iyo Ruushka. Fadlan ayaga ka soo guurso internetka laga gelayo [mndental.org](http://mndental.org).

(SOMALI)